

**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA APRIL 2024



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Abriil 2024 ayaa gaaray 148.42, marka la barbardhigo 145.34 bishii Maarso 2023.

Isbedel bileedka, Abriil 2024, marka la barbar dhigo Maarso 2024, ayaa hoos u dhacay 2.12 boqolkiiba.

Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa qiimaha **Alaabaha yaryar & Adeegyada** 10.98 boqolkiiba iyo **Farayaamada, Guriyeynta & Dayactirka** 3.72 boqolkiiba. Sare u kaca **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ugu badan ayaa inta badan ka yimid qiima kororka **Daryeelka Shakhsi ahaaneed** 19.55 boqolkiiba. Qiimaha kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **Agabka kale** 71.97 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee **Farayaamada, Guriyeynta & Dayactirka** ayaa ka yimid **Alaabta dhaloyinka, Alabta Miiska iyo Maacuunta Guriga** 12.90 boqolkiiba.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Abriil 2023 iyo Abriil 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.21 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.86 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Maarso 2023 iyo Maarso 2024.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Abriil 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Maarso 2024	
Tusaha bishan (Abriil 2024)	148.42
Tusaha bishii hore (Maarso 2023)	145.34
Tusaha sanadkii hore (Abriil 2023)	141.08
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	2.12%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.21%

Heerka sicir bararka maka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12bilood

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Abriil 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Abriil 2024

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Abriil 2024

Heerka sicir-bararka bisha Abriil 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Abriil 2023 iyo Abriil 2024.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.21 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Abriil 2023 iyo Abriil 2024, marka labar bardhigo 5.86 boqolkiiba 12kii bilood, Maarso 2023 iyo Maarso 2024.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Abriil 2024 ayaa sameeyey hoos u dhac dhan 2.12 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Abriil 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 2.55 boqolkiiba, bishii Abriil 2024 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 1.32 boqolkiiba bishii Maarso 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -3.97 boqolkiiba bishii Abriil 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -2.04 boqolkiiba Maarso 2024.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sare u kac bille ah sameeyey 1.56 boqolkiiba ee Abriil 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 10.58 boqolkiiba Abriil 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo sare u kacay 8.88 boqolkiiba ee Maarso 2024.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Abriil 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Abriil 2024(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 61.87 boqolkolkiiba bishii Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+94.60 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 32.65 boqolkiiba Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+28.58 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+78.86 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 18.16 boqolkiiba Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+20.58 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 10.58 boqolkolkiiba bishii Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Kirada (+19.40 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 9.86 boqolkolkiiba bishii Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Gaadiidka (+31.40 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa sababay qiimaha rakabka gawarida dhulka (+45.11 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 8.79 boqolkiib bishii Abriil 2024. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (+9.70 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 7.84 boqolkiiba Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+24.71 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto Dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Abriil 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 7.10 boqolkiiba bishii Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+11.03 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 5.71 boqolkiiba, bishii Abriil 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+18.52 boqolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Abriil 2024(-)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sanadlaha ahi hoos u dhacay -3.97 boqolkiiba, bishii Abriil 2024, sare u kaca ayaa ka yimid qiimaha cuntada -3.97 boqolkiiba. Sababta, hoos u dhac ku yimid qiimaha rootiga & badarka oo gaaray -7.92 boqolkiiba.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB –da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Abriil 2024

(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Abriil 2024(+)

- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 10.98 boqolkiiba Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+19.55 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac bille ah oo dhan 3.72 boqolkiiba Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+12.90 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac bille ah oo dhan 3.59 boqolkiiba Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+3.44 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Ragga +10.09 boqolkiiba.

- **Cuntada & Cabitaanada** ayaa sameeyey sare u kac bille 2.55 boqolkiiba bishii Abriil 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid cuntada 2.62 boqolkiiba. Sababta, qiima kor kudhacay qiimaha Saliida iyo dufanka 22.00 boqolkiiba.

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

- Ma jirin hoos u dhac muuqda ee Abriil.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Abriil 2024ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Abriil 2023 TSB	Maarso 2024 TSB	Abriil 2024 TSB	% Boqolkii ba Bishii iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha TSB	100.00	141.08	145.34	148.42	2.12	5.21
Cuntada & Cabitaanada	46.04	152.33	142.63	146.28	2.55	-3.97
Tubaakadda	1.25	159.76	173.80	173.80	0.00	8.79
Dharka & Kabaha	5.03	165.84	212.37	219.99	3.59	32.65
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	128.62	140.03	142.22	1.56	10.58
Agabka Guryaha	2.93	114.74	119.30	123.74	3.72	7.84
Caafimaadka	5.00	172.91	182.78	182.78	0.00	5.71
Gaadiidka	3.77	109.51	120.03	120.31	0.24	9.86
Isgaarsiinta	2.80	103.03	166.78	166.78	0.00	61.87
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacliinta	4.00	109.11	116.95	116.95	0.00	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	156.13	156.13	0.00	7.10
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	114.03	121.41	134.74	10.98	18.16

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan goysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Maajo, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Juun, 2024. Wixii faahfaahintaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogenea rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Abriil 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Abriil 2024 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Abriil 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia